



BOOSTADA
MAAY QAADI
DOONTO HADDII
AYSAN LAHAYN
FARAANKA
BOOLADA DARA-
JADA KOOWAAD
(FIRST CLASS
POSTAGE)

RETURN TO: Secretary of State
60 Empire Drive
Suite 100
St. Paul, MN 55103

Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho doorashada ama natiijooyinka doorashooyinka waxaad eegtaa bogga internetka ee Xoghayaha Gobolka Minnesota www.sos.state.mn.us ama waxaad wacdaa khadka bilaashka ah ee **1-877-600-VOTE (1-877-600-8683)** ama waxaad wacdaa Adeegga Lalinta Wararka 1-800-627-3529 ama 711.

Warbixinta Waqtiga Kama Dambeysta ah

Waxaa hore isu sii diiwaan gelin kartaa cod bixinta ugu yaraan 20 maalmood doorashada ka hor. Haddii aadan awoodin in aad hore isu sii diiwaan geliso 20 maalmood doorashada ka hor, waa in aad iska diiwaan geliso goobta cod bixinta Maalinta Doorashada.

Arjiyada diiwaan gelinta cod bixinta waa in loo gudbiyo Hubiyaha Degmada ama Xoghayaha Gobolka 10 maalmood inta aan la gaarin ee taariikhda la saxiixo kaddib.

Caawimaad

Haddii laga codsado Hubiyaha Degmada ama Xafiiska Xoghayaha Gobolka waxaa laga helayaa Arjiyada Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Minnesota oo farta waaweyn ku qoran.

Waxaa jira caawimaad gaar ah ee loogu talagalay waayeelka, dadka itaal darran, ama dadka ku nool xarumaha caafimaadka. Waxaad la soo xiriirtaa Xoghayaha Gobolka ama Hubiyaha Degmada si aad macluumaad dheeraad ah u hesho.

Arjiyada Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha oo luqado kale ku qoran ayaad ka helaysaa bogga internetka www.sos.state.mn.us.

Lambarkaaga Daryeelka Bulshada waxa laga dhigayaa mid ka qarsoon bulshada kale. Inta aadan sanduuqa 7 ku qorin 4taada lambar ee SSN-ka, waxaad fadlan akhrisaa ogeysiiska gaarka ah ee ku qoran bogga internetka www.sos.state.mn.us/home/index.asp?page=207.